

23 Noofembar 2016

Mamnuucida gudniinka dumarka iyo carruurta (FGM) ee Sweden

Dhamaan carruurta Swiidhan degan waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudubka iyo dagaalka. Taasi waxa ka mid ah dhamaan noocyada gudniinka xubnaha taranka dumarka (FGM), sida gudniinka, daloolinta, gubasho, tolida. Dhamaan qaliinada aan caafimaadka ku lugta laheyn ayaa mamnuuc ah.

Dhamaan carruurta waxay xaq u leeyihiin caafimaadka ugu wanaagsan. Marka la sameynaayo qaliinka laftiisa (gudniinka, daloolinta, gubasho, tolida), waxay gabadhaadu khatar ugu jirtaa inay aad u dhiigbaxdo iyo xanuun, iyo in ay qaado infegshan, tusaale ahaan infegshanaa dhiiga raaca. FGM sidoo kale waxay shoog galisaa carruurta iyadoo khatar ugu jirta inay soo gaadho dhibaatooyinka dhimirka. Taas oo kaliya ma aha, carruurta loo geysto FGM waxay khatar ugu jiraan caafimaad darro nolosha oo dhan ay qabaan. Ta ugu badan waxa weeye inaanay caadi u kaaji karin: wakhti badan ayay qaadataa waana mid xanuun badan leh. Marka ay gabadhu ka sii korto ee ay hesho caadada, dhiiga aan ka soo bixin waxa uu keeni karaa xanuun badan. Taasi waxay keeni kartaa madax xanuun, calool xanuun, dhabar xanuun iyo dabecada oo isbabadesha. Taas waxa dheer, dumarka qaarkood ee ay soo martey FGM waxay yeeshaan dhibaatooyin galmada iyo dhibaatooyin inay carruur helaan. Waa sharci darro in la sameey dagid, iyo - marmarka qaarkood in la kor loogu qaado FGM


Sharciga Swiidhan waxa uu sheegayaa in masuulka ilmahu ay ka yihiin mas'uul inay ilmahooda ka ilaaliyaan marka lagu darro in lagu sameeyo FGM. Haddii masuulka ilmahu aanu samayn dadaal ku filan si uu ilmahooda uga ilaaliyo FGM ayaa lagu xukumay karaa maxkamad Iswiidhan, xataa haddii uu qof kale sameeyo qaliinka, iyo xataa haddii uu ka dhaco Swiidhan meel ka baxsan.

Haddii ilme degan Swiidhan loo geysto FGM, iyadoo aan loo eegeyn waddanka taasi ka dhacdey iyo cida sameysay ayaa masuulka waxa laga yaabaa in lagu xukumi karro xadhig.



Martin Myrskog
Agaasimaha Gobolka
Gobolka Kronoberg






Ingrid Burman
Guddoomiyaha
Gudiga Maamilka
Gobolka






Klas Friberg
Regionpolitisk
Taliyaha Polisen
Gobolka
Hay'ada Booliiska





Carl-Gunnar Fridolfsson
Xeert ilaaliyaha guud
Hay'ada Xeermarinta
Swiidhan



Språk: Somaliska